# Waxaa lagaa daweynayaa waxa loo yaqaan sepsis

Sepsis waxay dhacdaa marka jawaabta jidhku ka bixiyo caabuqa ay dhaawacdo unugyadiisa iyo xubnihiisa caafimaadka qaba. Waxaad qabtaa caabuq laga yaabo inuu keenay sepsis. Sepsis waa xaalad degdeg ah oo caafimaad oo u baahan daryeel caafimaad oo degdeg ah.

## Sidee loo daaweeyaa sepsis?

Sebsis waxa lagu daweeyaa isbitaalka, daawayntana waxay si fiican u shaqaysaa marka loo bilaabo sida ugu dhakhsaha badan. Dadka qaar ee qaba sepsis waxay u baahan yihiin in lagu daaweeyo qeybta daryeelka sida joogtada ah loola soconayo ee loo yaqaan intensive care.

Daaweynta waxaa qeyb ka ah antibiyootiga, iyo haddii loo baahdo:

- daawooyin kale
- dareeraha xididka (faleenbo)
- taageerada neefsashada
- qalliin.

## Soo kabashada iyo isbitaalka oo hadhoowna laga saaro

Intaadan ka bixin isbitaalka ka hor, kooxda ku daryeelaysa ee caafimaadka ayaa eegi doonaan:

- soo kabashadaada iyo inta ay qaadan karto
- sida looga hortagi karo caabuqyada
- waxyaabaha loo baahan yahay inaad la socoto hadii aysan xaaladaada soo roonaaneyn, ama aad dareemayso inay kasii darayso.
- daawooyinkaaga iyo sida loo baahan yahay inaad u qaadato
- wixii saameyn muddo badan sii socon karo ah iyo daryeelka aad u baahan karto hadhow.

Haddii sepsis uu hore kuugu soo dhacay, waxaad haysataa fursad sare oo aad mar kale ku qaadi karto. Haddii aad ka welwelsan tahay in xaaladaada ay ka sii dartay markaad isbitaalka ka baxdo ka dib, fadlan wac **13Health** si aad u hesho talo, u tag dhakhtarkaaga guud (GP) ama isbitaalka dib ugu soo laabo.

## Saamaynta muddada dheer ah

Ka soo kabashada xanuunka sepsis waxay qaadanaysaa waqti, dadka qaarna waxay qabaan dhibaatooyin waara. Waxa laga yaabaa inaad in muddo ah xanuunsanayso ama ay kugu adkaato inaad ku soo noqoto hawlihii caadiga ahaa. Haddii aad ka welwelsan tahay, la hadal dhakhtarkaaga ama kooxda caafimaadka ee ku daryeelaysa si aad u hesho taageero.

Waxaa laga yaabaa in difaaca jirkaaga uu daciifo in muddo ah, taasoo suurtagelin karta in infekshan kugu dhasho. La soco oo qaado tallaaladaada, ku dadaal nadaafadda wanaagsan, oo weydii kooxda caafimaadka ee ku daryeelaysa wixii daaweyn ah ee ku caawin karta.

## Taageerada aad heli karto inta uu ku hayo xanuunka sepsis iyo ka dib ba.

La socodsii kooxda caafimaadka ee ku daryeelaysa haddii aad u baahan tahay turjubaan ama Howlwadeena Xiriirka Dhaqanka (Cultural Liaison Officer).

Eeg QR koodhka hoos ku daabacan, ama baadhitaan (search) ku samee Sepsis Australia, si aad u hesho kooxaha taageerada sepsis kuwaas oo caawin kara adiga iyo qoyskaaga inta aad kasoo kabaneyso.

Iskaan garee QR koodh-ka haddii aad rabto inaad nala wadaagto ra'yigaaga ku aadan daabacaadan.

Iskaan garee QR koodh-ka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo taageerada sepsis

DELIVERING FOR QUEENSLAND

Queensland Government

SC26000479_V1.2 06/2026